# BIG SHOAL PRIMITIVE BAPTIST CHURCH

Xabaalaha Big Shoal waxay ku yaalliin dhul horay u ahaan jiray Kaniisadda Big Shoal Primitive Baptist waxana soo agaasimay Elder William Thorp sannadku markuu ahaa 1823. Dhulka xabaalaha deegaanka waxa ku deeqay John Hightower (waxa la aaminsan yahay inuu ka dhex dhisay guryaha looxa ka sameysan ee ku gudayaalla Beerta iyo Madxafka Atkins-Johnson. Milkiyadda dhulka waxa si wadajir ah u xereeyay xubnaha kaniisadaas sannadku markuu ahaa 1830-yadii.



Markii la gaaray sannadkii 1851, xubnuhu waxay gaareen in ka badan 200, waxaana la arkay in kaniisaddii qoryaha laga dhisay ay aad u yar tahay. Sannadkii 1854, kaniisad cusub oo bulukeeti ah ayaa laga dhisay goobtii hore. Dhismaha cusub, ee kor ku sawiran, waxaa la dhameystiray sannadkii 1854.

Ka dib markii xubnuhu ay yaraadeen dabayaaqadii 1800-meeyadii iyo bilowgii 1900-meeyadii, kaniisaddu waxay qabatay adeeggeedii ugu dambeeyey sannadkii 1917. Intii lagu jiray 1920-meeyadii iyo 1930-meeyadii, waxaa la sameeyay dadaallo lagu uruuriyay deeqo si loo badbaadiyo dhismaha kaniisadda loogana dhigio aasaas taariikheed. Si kastaba ha ahaatee, dhismuhu wuxu ku jiray xaalad burbur ah oo wuu ka sii darayay. Sannadkii 1948-dii, ayaa haraagii dhismaha la burburiyay.

## BOOQO XABAAL

**Xabaalaha Big Shoal**
Booqdayaasha waxa lagu soo dhoweynayaa inay booqdaan xabaalaha Big Shoal laga bilaabo waaberiga ilaa qorrax dhaca, 7 maalmood usbuucii, sanadka oo dhan. Goob baabuurta la dhigto oo bilaash ah ayaa ku taalla ee NE 64th Street. Buugyare kaa hagaya meelaha aad marayso ayaa lagu bixiyaa miiska macluumaadka ee xabaalaha. Xabaalaha waa hanti dadweyne waana bilaash mar walba oo loo furan booqdayaasha.

**Macluumaadka barta baabuurta la dhigto**
Baarkinku waa bilaash wuxuuna ku yaalaa albaabka weyn ee laga galo waddada NE Antioch Road.

**Booqdayaasha Naafada ah**
Baarkin loo qoondeeyay dadka naafada ah ayaa diyaar ah, jidadka socodka iyo musqulaha waa kuwo lagu mari karo gaari curyaan. Booqdayaasha naafada ah waxay marin u heli doonaan qaybaha dabaqa weyn ee guriga beeraha, laakiin ma geli karaan qolalka fadhiga, qolka jiifka, iyo albaabka hore. Macalimiinta hagayaashu waxay diyaar u yihiin inay bixiyaan macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qolalka leh marin helitaan xaddidan.

**Siyaasadda Xayawaanadda Rabbaayadda ah**
Marka laga reebo eyda hageyaasha ah, xayawaanka rabaayadu ma geli karaan gudaha matxafka ama goobta xabaalaha.

***Waxa Aanu Qabano...***

1. *Waxaanu aqoonsanaa taariikhda aaggeenna, annagoo wax ka ogaanayna dadka, meelaha, iyo sheekooyinka waayihii hore.*
2. *Waxaanu dhowrnaa oo ilaalina goobahaan anagoo sameynayna dedaalo lacag uruurineed iyo ilaalineed.*
3. *Waxaanu la wadaagnaa booqdayaasha da' walba leh xog si ay falgal iyo xiriir qoto dheer ula yeeshaan waayihii hore.*

**Waad ku mahdsan tahay booqashadaada! Haddii aadan qorshaynayn inaad sii hayso buug-yarahan, fadlan celi.**

# Big Shoal XABAAL

GLADSTONE, MISSOURI



Xabaalaha Big Shoal waa qubuurihii lagu aasay dad badan oo degnaa Degmada Clay laga soo bilaabo 1820-meeyadii illaa 1947-dii. Iyadoo horay u ahaan jirtay beero qoysqoys ah, gobolkan waxa hadda loo yaqaanaa Gladstone, Missouri. Dadkii horay u degenaan jiray waxa ka mid ahaa Atkins, Hughes, Faubian, Broadhurst iyo Burnett. Dadka kale ee ku aasan Big Shoal waxa ka mid ah halyeeyadii tiro "dagaallo" ah oo Qaran saameyn ku lahaa oo uu ka mid yahay dagaalkii 1812-kii. Dagaaladii Hindida ee Blackhawk iyo Dagaalkii Sokeeye ee Maraykanka.

Sannadkii 2009, Magaalada Gladstone ayaa la wareegtay xabaalaha Big Shoal ee la iskaga tagay iyada oo loo maray Xeer-ilaaliyaha Guud ee Missouri.

# Bulshada Big Shoal

Koox bulsho ah oo kobcaysa ayaa degtay aaggan laga soo bilaabo 1820-meeyadii, oo qaar badan oo ka mid ahi qayb ka ahaayeen kaniisaddan. Dadkan foolaadka ahi waxay soo dageen dacalka hore qaranka waxayna degeen meel waxyar u jirta dhulwaynaha dadka asalka ah. Waxay ahaayeen ganacsato, beeralay, iyo tujaar helay qaabab ay u noolaan karaan oo qoysas u dhisan karaan.

**1. Ferdinand V. Thompson: Dagaalkii Sokeeye (Saajin, Shirkadda I, Ciidanka Milatariga Missouri qaybta 82aad Midowga; Jabhad, Konfederate)**
*Dis. 15, 1835 – Feb. 11, 1890*
Ferdinand "Ferd" Thompson wuxu ahaa nin beeralay ah oo ka yimid Indiana. Wuxuu guursaday Rubena "Rebecca" P. Allen oo kasoo jeeday Kentucky, waxayna isu dhaleen shan carruur ah.

**2. William Henry Atkins: Dagaalkii Sokeeye (Askari, Ilaalada Gobolka Missouri, Konfederate)**
*Sibt. 2, 1836 – Luulyo 9, 1902*
William Henry Atkins wuxuu ahaa beeraley, farsamayaqaanka gaari-faraska, wuxuuna dhowr jeer u shaqeeyay garsoore ka tirsan Degmada Clay ahaan. Wuxuu ku dhashay Missouri, waalidkiisuna waxay ahaayeen Jonathan Q. iyo Mary Atkins, oo ka mid ahaa dadkii hore u degay Degmada Clay. William wuxuu ku barbaaray Beerta iyo Matxafka Atkins-Johnson, kaas oo uu markii dambe maamulay. Halkaas ayuu ku dhintay ka dib markii uu shil gaari faras qoorta kaga jabay. Waxa lagu sheegaa inay tani ahayd tacsidii ugu ballaarnayd ee lagu qabta Kaniisadda Big Shoal Baptist.

**3. Daniel D. Brown**
Daniel Brown wuxu ahaa qofkii ugu dambeeyay ee lagu aasay xabaalaha 1947. Wuxu ka soo baxsaday Indiana una baxsaday koonfurta Missouri si uu "fardo-wade" uga noqdo Waddada-tareenka ee Missouri Pacific. Wuxuu guursaday Minerva Malott sannadkii 1885. Brown wuxu aad ugu dhibtooday ka shaqeynta beertooda oo ahayd 80-akar ka dib markii uu ku dhacay xanuunka tayfowdka. Hamigiisu wuxuu ahaa inuu noqdo fardo-wade, taasoo keentay in qoyska ay ka qayb qaataan Tartankii Dhulka ee Oklahoma sannadkii 1889, ka hor inta aysan ku soo laaban beertoodii.

**4. Minerva White Malott Brown**
*1863 – 1909*
Minerva Brown waxay guursatay Daniel D. Brown iyada oo 22 jir ah. Carruurtoodii waxay ahaayeen Della Myrtle iyo Rhoda Bessie. Intii ay ku noolaayeen teendho Oklahoma ku taalla, Minerva waxay barbaarin jirtay carruurta waxayna bilowday maqaaxi guri oo ay cunto ugu diyaarin jirtay shaqaalaha wadada tareenka. Minerva waxay ku dhimatay 46 jir waxana dilay kansarka naasaha.




**5. Zachariah Thorp: Dagaalladii Black Hawk ee Hindiyaanka (Ciidamada Fardaha Wata ee Maraykanka)**
*Jan. 22, 1809 – Agos. 26, 1893*
Zachariah Thorp wuxuu ahaa mid ka mid ah dadka ugu horreeyay ee degay Degmada Clay, wuxuuna qaraabo la ahaa Elder William Thorp.

**6. Clarington Matt Fugitt: Dagaalkii Sokeeye(Shirkadda A, Ciidankii Saddexaad ee Infantry-ga Missouri)**
*Abril 6, 1834 – Dis. 28, 1915*
Fugitt wuxu ku dhashay Missouri waxana dhalay Hiram iyo Nancy Fugitt. Waalidkiis waxay ahaayeen dadka asal ahaan ka soo jeeda Kentucky ee mar la yimid gobolka Missouri Daniel Boone.

**7. Thomas J. Hamilton: Dagaalka Sokeeye (Laba-xiddigel, Jabhad, Konfederate)**
*1831 – Agos. 14, 1862*
Thomas J. Hamilton Waalidkii waxay ahaayeen Mary iyo Jesse Hamilton. Wuxu ahaa beeralay. Intii lagu jiray Dagaalkii Sokeeye, Hamilton wuxu galay dagaal kooban waxaana la dilay meel u dhow magaalada Barry taariikhdu markay ahayd 14-kii Agoosto, 1862. Walaalkiis Presley ayaa sidoo kale ahaa jabhad Konfederate ah oo isna ku dhintay dagaalka.

**8. William Lycurgus Thompson: Dagaalkii Sokeeye (Askari, Shirkadda 1, Ka Diiwaangashanaa Ciidankii Milatariga Missouri ee 82-aad ; Jabhad, Konfederate))**
*Meey 21, 1833 – Abriil 4, 1891*
William Lycurgus (Kirk) Thompson wuxu ku shaqeysan beeralaynimo iyo kormeere ahaan. Wuxu ahaa mid ka mid ah todobo carruur ah oo ay dhaleen Jesse iyo Julia M. Thomspson.

**9. Richard S. (Lee) Barnes: Dagaalkii 1812 (Askari, Qeybta Todobaad ee Ciidanka Maleeshiyaadka tabaruca Kentucky iyo Fardoolayda Kentucky)**
*Agos. 7, 1791 – Jan. 5, 1861*
Barnes wuxu si tabaruca ciidanka ugu biiray 1812 iyo markale oo 1813 ah. Wuxuu ka qayb qaatay Dagaalkii Thames, kaasoo uu ku dhintay Hoggaamiyihii Dagaalka Shawnee, Tecumseh. Wuxuu guursaday Elizabeth Atkins sannadkii 1818 wuxuuna u soo guuray Degmada Clay sannadkii 1823. Barnes wuxu ka shaqeyn jiray Kaniisadda Big Shoal Baptist. Waxaa loo magacaabay Sarkaalka Booliska Degmada sannadkii 1827.

**10. Elizabeth Barnes**
Elizabeth Atkins Barnes waa qofka ugu da'da weyn ee ku aasan Big Shoal, iyadoo jirtay 100 sano, hal bil, iyo siddeed maalmood. Reer Barness waxay lahaayeen toddobada carruur ah.

**Xabaalo bilaa calaamad ah**
Xabaalaha qaar baa bilaa calaamad ah. Qubuuraha hareerahooda, waxa ku yaalla goobo calaamadsan oo ay ku qoran tahay "waxa laga yaabaa inay tahay xabaalo bilaa calaamad ah". Calaamadahaasi waxay muujinayaa goobaha xabaalaha lagu ogaaday raadar dhulka hoose u gudba iyo barsugayaasha GPScoordinates.

**Mary Ellen Hughes iyo Mary Olive Hughes**
*Luulyo 1 and Luulyo 3, 1918*
Marry Ellen waxay dhimatay markay dhalatayba. Mataanteedii, Mary Olive, waxay dhimatay laba maalmood ka dib.

**Frances Atkins**
Frances Atkins waxaa lagu aasay Big Shoal sannadkii 1828, tan oo ka dhigaysa inay suurtogal tahay inuu yahay qofkii u horreeyay ee diiwaangashanaa ee ku aasan xabaalaha.

**James Thomas Price: Dagaalkii Sokeeye ((Shirkadda F, Cutubka Shelby, Ciidanka Fardaha ee Saddexaad ee Missouri, Konfederate))**
*Sibt. 28, 1842 – Nof. 7, 1924*
James Price wuxuu ku dhashay Missouri, waalidkiisna waxay ahaayeen Thomas iyo Mary Price. Dagaalkii Sokeeye ka dib, Price wuxuu guursaday Nancy Mosby sannadkii 1866, wuxuuna markale guursaday Matilda Brown sannadkii 1878. Wuxu haystay laba gabdhood. Mary iyo Nancy.

**Lou Dale, xaaska Lee Dale**
*Mar. 15, 1883– Jan. 24, 1903*
Lou Dale waxay geeriyootay laba toddobaad ka dib markii ay dhashay mataano iyadoo 19 jir ah. Waxay ahayd gabar ay korsadeen J.G.D. Housman.